Ku soo dhawoow Ljungbyhed
Halkaan waxaa laguugu soo gudbinayaa warbixin oo loogu talagalay qofka adigoo kale ah oo bulshada ku cusub.

Shirkadda Ljungbyhed Park waxaa laga helayaa qoraal warbixin ah oo ku saabsan degmada Klippan.

Xushmee dadka jiiraanka ah iyo dadka kale oo xaafadda ku nool
Meesha aad deggan tahay waxaa deggan dad badan oo jiiraan ah. Haddii aad xushmad u muujisana iyaguna waxay iyaguna kuu muujinayaan xushmad taas oo kale ah.

Beerta ama jardiinada aqalka ku wareegsan waa mid gaar loo leeyahay oo lama oggola in la iska galo. Waxaa kaloo aan la oggolayn in miro laga gurto dhirta beertaas ku dhextaal.

Iswiidhen waxaa mamnuuc ka ah in sigaar lagu dhexcabbo guryaha dadweynuhu isugu yimaadaan. Kuwaasna waxaa ka mid ah meelaha lagu qaxweeyo, maqaayadaha, dukaamada iyo wixii la mid ah. Waxaa kaloo mamnuuc ah in sigaar lagu dhexcabbo guryaha la deggan yahay, waayo wuxuu qiiqa ka dhashaa sababi karaa in alaarmigu qayliyo.

Eeygu wuxuu dad badan oo Iswiidhen ku nool u yahay xayawaan wehel ah oo guryaha lagu haysto. Haddii aad la kulanto qof aadan aqoon oo eey wata, ha isku dayin inaad salaaxdo eeygaas. Waxaana taas looga dan leeyahay in aad adiga iyo eeyguba badbaadaan. Eeyaashu waa khalkhali karaan marka ay dad cusub la kulmaan.

Haddii aad u baahan tahay inaad qashin soo tuurto, marka hore isticmaal dambiil xaashi ka samaysan guriga gudihiisa iyo dibeddiisaba.

Agagaarka meesha aad hadda deggan tahay waxaa ku yaal barxad lagu cayaaro golofka. Xasuusnow inaad xushmeyso meelaha ay xirteen oo aadan ka gelin. Barxadda golofku waxay furan tahay sannadkoo dhan, waana khatar in dadka aan shaqada ku lahayni dhexgalaan.

Safaro iyo gaadiid
Ljungbyhed waxaa ka baxa basas aada Klippan. Waxaadna halkaas uga sii dhoofi kartaa magaalooyinka Helsingborg iyo Hässleholm.
Waxaad kaloo baskaas u raaci kartaa maxaddada Stehag oo aad ka sii raaci karto tareen aad ku aaddo magaalada Malmö.

Markaad baska raaceyso waxaad kharashka tigidhka ku bixin kartaa kaarka bangiga ama kaarka ”Jo-Jo” oo laga goosto shirkadda gaadiid Skåne ee Skånetrafiken.
Kaarka ”JoJo” waxaad ka iibsan kartaa maxaddada Klippan ama magaalada kale oo kuugu dhow, sida Helsingborg.

Tigidhka laga ma goosan kartid tareenka dhexdiisa ee waa inaad ka sii goosataa mishinka maxaddada ku dhexyaal inta aadan tareenka fuulin. Waxaadna ku bixin kartaa lacag caddaan ah ama kaarka bangiga ama kaarka ”Jo-Jo” oo ay goyso shirkadda gaadiidka ee Skåne.

Barta internet ee shirkadda gaadiidka ee Skåne oo ah www.skanetrafiken.se waxaa ku qoran warbixino ku turjumnaan kara luuqado badan oo Af-carabigu ka mid yahay. Halkaasna waxaa ku qoran jadwalka basaska iyo tareenada iyo warbixino kale.

Iswiidhen waxay noqotaa mugdi maqrinkii iyo habeenkii, siiba bilaha qaboobaha. Sidaas awgeed waxaa muhiim ah in aad xirato qalab mugdiga ifa mar walba oo aad dibedda socoto. Xasuusnow inaad ku socoto geeska waddada haddii aad ku lugeyneyso waddo baabuur marayso. Haddiise uu jiro marshaniyeedo waddada dhinac mara, waa inaad kolkaas halkaas ku socotaa.

Wax iibsi
Ljungbyhed waxaa ku yaal dukaamada Hemköp iyo Lantmännen oo aad ka iibsan karto cuntooyin, qalabka nadaafadda iyo waxyaalo kale oo badan.
Meelahaas waxaad wax uga iibsaneysaa kaarka bangiga ama lacag caddaan ah oo iswiidhish ah.

Waxaa kaloo Ljungbyhed ku yaal foornada Ljungbyhed oo aad ka iibsan karto rooti iyo bur macmacaan.

Haddii aad haysato lacago qalaad sida Euro, wax ayaad meelahaas uga iibsan kartaa. Xasuusnowse in dukaanka Hemköp uu qaadan karo lacag euro oo xaashida ah oo aan ka badnayn £100. Waxaana laguu soo celinayaa baaqi iswiidhish ah.
Waxaad kaloo xasuusnaataa in dukaamadu ay yaryar yihiin oo haddii dadka wax iibsanayaa ay ku soo bataan uu safku dheeraanayo. Kolkaas waxaa dhammaanteen naloo ka baahan yahay inaan dulqaadano oo ogaanno in ay waqti qaadan karto ilaa la soo gaarayo marka kharashka la bixinayo. Inta dukaanka lagu dhexjiro lama oggola in la jebiyo, la dillaciyo ama la furo baakado ilaa badeecadaas laga iibsanayo oo lacagta la bixinayo.
Dhamman tuuganimada ama in alaab la iska qaato iyadoo aan la bixin waxaa lagu dacweynayaa boliiska.

Waxaad kaloo baska u raaci kartaa Klippan, halkaas oo aad ka heleyso dukaamo farabadan, sida kuwa dharka lagu iibiyo.

Waxaa muhiim ah inaad xushmeyso habka safgelidda. Haddii lambarka jiro qaado mid oo sug ilaa inta lambarkaaga loo yeerayo. Haddii uusan jirin lambar waxaad geleysaa safka adigoo istaagaya qofka ugu dambeeya gadaashiisa. Waxaad kaloo xasuusataa in aadan dukaanka ka geli karin meesha lacagta laga bixiyo.

Adeegga bulshada
Haddii aad u baahan tahay inaad la xiriirto Hay'adda caymiska dadweynaha, Xafiiska shaqada ama Hay'adda canshuuraha, waxaad kuwaas oo dhan ka heleysaa degmada Klippan.

Waxaa kaloo Klippan ku yaal xafiiska maamulka degmada Klippan.

Daryeelka caafimaadka iyo bukaanka
Haddii aad ka yar tahay 18 sano waxaad xaq u leedahay in lacag la'aan lagugu daaweeyo haddaad xanuunsato.
Haddii aad ka weyn tahay 18 sano waxaad xaq u leedahay daaweyn xanuun kedis oo halis ee xagga jirka ama ilkaha oo aadan sugi karin.

Degaanka Ljungbyhed waxaa ku yaal rug daryeel caafimaad iyo dhakhtar ilkaha.
Rugta daryeelka caafimaadka waxaad tegeysaa haddii aad qabto xanuun aan sidaas khatar u ahayn. Waxaa dhici kara in ay adag tahay inaad waqti ka hesho rugta daryeelka caafimaadka kuugu dhow

shaqada oo aad ugu badan awgeed. Markaas waxaad aadi kartaa rugta kale ee daryeelka caafimaadka oo kuugu dhow. Haddii aad adigu ama qof kuu turjumaaya aad goor hore soo wacdaan, waxay taasi shaqaalaha caafimaadka u fududaaneysaa shaqaooda.

Haddii uu kugu soo boodo xanuun aad ah, waxaa kolkaas laguu qaadayaa isbitaalada magaalooyinka waaweyn midkood.

Waxaad warbixin dheeraad ah oo ku saabsan daryeelka caafimaadka ka akhrisan kartaa barta internet oo ah www.1177.se, halkaas oo aad ka heleyso warbixino daryeelka caafimaadka ku saabsan oo ku qoran afaf kala duwan adigoo halkaas ka heli kara talooyin iyo caawimaad. Waxaad kaloo waci kartaa lambarka 1177.

Ammaanka iyo badbaadada
Si aan bulsho ahaan u dareeno ammaan waxaa muhiim ah inaan dhammaanteen istixgelinno. Taas waxay la micne tahay inaan u dhaqanno hab deggan oo akhyaarnimo ah markaas bannaanka dadka dhex soconno. Haddii aad dareento in laguu hanjabay ama si xun laguu la dhaqmay waxaad taas u sheegeysaa shaqaalaha guriga aad deggan tahay.

Haddii la arko meel dab qabsaday, waa in loo yeeraa kooxda dabdamiska. Xasuusnow in guriga aad deggan tahay uu dhexyaal qalab dabka ka diga oo markii qiiq taabto qayliya. Sidaas awgeed ayey aad muhiim ugu tahay in aan guriga dhexdiisa lagu cabbin sigaar waayo waxaa qaylodhaanka qiiqaas ka dhashaa gaari karaa kooxda dabdamiska. Xasuusnow in mar walba oo ay yimaadaan uu kharash ku baxayo. Waa wax muhiim in la xushmeeyo shaqada kooxda dabdamiska.

Haddii qof aad u xanuunsado oo lagu soo boodo, waxaa loo wacayaa ambalaas si qofkaas loogu qaado isbitaalka oo uu halkaas uga helo daryeelka ku habboon.

Haddii adiga ama qof kugu dhow loo geysto fal dembi ah waxaa la wacayaa ciidanka boliiska.

Haddii ay timaaddo xaalad degdeg ah, sida dhaawac halis ah ama shil, waxaa lacag la’aan lagu waci karaa xarunta gargaarka degdegga ah oo lambarka telefoonku yahay 112. Xarunta gargaarka degdegga ah waxaa ka hawlgala shaqaale ku hadla afaf kala duwan. Waxaase xarunta gargaarka degdegga ah la waci karaa markii ay xaalad degdeg ahi jirto, haddiise aysan xaalad degdeg ah jirin waxaa la wacayaa ciidanka boliiska oo lambarkoodu yahay 114 14.

Boggaan internet www.informationsverige.se waxaa ku qoran waxbixin ku saabsan bulshada iyo sida ay shaqayso, waana akhris xiiso leh oo kaa caawini doona nolosha cusub oo aad Iswiidhen ka bilowday.